الموضوع: الندوة العلمية السنوية السادسة

تحت عنوان: وَلَا تَتَّبِعُوا السُّبُلَ فَتَفَرَّقَ بِكُمْ عَنْ سَبِيلِهِ

Bayaanka & fatwada gunaanadka nadwo sanadeedda 6aad ee magaalada Garoowe 2013

Kulancilmiyeedka oo muddo lix cisho ah ka socday masjidka weyn ee Alhudaa ee magaalada Garoowe waxaa ka qaybqaatay qaar ka mida culimada magaalada iyo culimo ka timid magaalooyinka kale ee dalka. Intii kulan-cilmiyeedku socday culimadu waxay muxaadarooyin kala duwan ka jeediyeen goobaha waxbarashada sida jaamacadaha, macaahidda sharciga ah iyo dugsiyada sare ee magaalada, iyagoo culimadu siiyay muxaadaraat gaar ah mas'uuliinta dowladda, Oday-dhaqameedyada, ducaadda iyo haweenka ku dhaqan magaalada Garoowe. Waxaa kale oo ay culimadu muxaadarooyin ka jeediyeen telefishinka caalamiga ah ee Puntland.

Waxaa soo xaadiray duruusta dadweyne farabadan oo rag iyo dumarba leh, waxaana ka qaybqaatay baahinta duruusta kulancilmiyeedkan lix idaacadood, afar telefishin iyo khadka internetka oo ay si toos ah ugala socdeen jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalalka qurbaha.

Gabagabadii kulancilmiyeedka magaalada Garoowe waxay culimadu waxay soo jeediyeen baaq xambaarsan fatwo sharci ah, kana kooban qodobbada soo socda:

بسم اللـــه الرحمن الرحيـــم

Allaah baa mahad oo idil iska leh, nabadgalyo iyo ammaanna nabigeennii Muxammad ahaa, eheladiisii, asxaabtiisii, atbaacdoodii iyo intii wanaag ka raacda tan iyo qiyaamaha dushooda ha ahaato.

Intaa kadib waxaan mahadnaq ballaaran usoo jeedineynaa dadka reer Puntland dowlad iyo shacabba annagoo ku bogaadineyna sidii diirraneyd, gacaltooyadana laheyd ee ay usoo dhoweeyeen culimada iyo nadwadaba, annagoo mahad gaara ahaaneed usoo jeedineyna madaxweynaha dowladda Puntland Dr. C/Raxmaan Sh. Maxamed Maxamuud oo isagoo safar shaqo ugu maqan dalka dibeddiisa lasoo xiriiray culimada soona dhoweeyay, ugana mahadnaqay dadaalka ay galiyeen in nadwadu hirgasho.

Waxaan mahad taa lamid ah u jeedineynaa dadweynaha Soomaaliyeed ee samajeclaha ah ee dal iyo dibad ku nool ee intii ay nadwadu socotay siiyay waqtigooda si ay uga faa'iideystaan cilmiga culimada muxaadaraatkii laga jeediyay nadwada, waxaanna Ilaahay ka baryeynaa in uu u sahlo barashada diinta waxa ay barteenna ku anfaco adduun iyo aakhiro.

Intaa ka dib waxaan naftayada iyo dadkayagaba u dardaarmaynaa cabsida Alle iyo ka dhowrsashada soohdimaha shareecadu inoo asteysay.

Ujeeddooyinka nadwada sanadkan 2013

b) In culimadu gudato xilka weyn ee Ilaahay ka saaray bayaaninta xaqa, ka digidda jidadka qalloocan ee lagu halaagsamo iyo u naseexeynta ummadda.

t) In dadweynaha Soomaaliyeed looga digo halista firqada khawaarijta ee dhibaatooyinkeeda ay siyaabo badan u saameeysay bulshadeenna muslimka ah.

j) In dadka loo tilmaamo in ay aqoon u yeeshaan diintooda, ogaadaanna dhibaatada firqooyinka lunsan in looga gaashaaman karo oo kaliya iyadoo aqoon dhab ah loo yeesho diinta Alle ee ay firqooyinka lunsan sida qaldan u tarjumeen una adeegsadeen.

Bayaan guud

1) Waxaan ugu baaqaynaa guud ahaan bulshada Soomaaliyeed inay Ilaahay u noqoto, ayna ka toobad keento dhammaan danbiyadii sababay heerka liita ee ay ka gaadhay hoos u dhaca ka saameeyay dhinac diineed iyo dhinac adduunyo labadaba.

2) Waxaan ugu baaqaynaa dadka Soomaaliyeed inay midoobaan, walaaloobaan, si wadajir, koox koox iyo kali-kali ahna u qabsadaan xarigga Ilaahay oo ah kan kaliya ee ay ku badbaadi karaan, ayna xeer ka dhigtaan shareecada islaamka: heer qof, heer qoys, heer qabiil, heer bulsho iyo heer dawladeed intaba.

3) Waxaan Shacabka Soomaaliyeed ugu yeeraynaa in ay ka waantoobaan kana weynaadaan khilaafaadka daakhiliga ah ee dhaliya dagaallada sokeeye ee halista ku ah diintooda, jiritaankooda, dadnimadooda iyo midnimadooda, khilaafaadkaasi ha ahaadeen kuwo Siyaasadeed, kuwo Qabyaaladeed iyo kuwo deegaan, annagoo bulshada ku adkeyneyna in ay ka korto dhaqannadaliita ee isku-guryo noqoshada, is-gumaadista iyo is-barakicinta, khilaafaadka dhexyaalna ay ku xalliyaan wadahadal daacad ah, is-afgarad iyo isu tanaasul taas oo keeni doonta kalsooni, walaalnimo, iskaashi, midnimo iyo horumar.

4) Waxaan ummadda Soomaaliyeed ugu baaqeynaa ilaalinta amniga iyo wax walba oo kaalmo u ah xasilloonida dalka, annagoo ogeysiineyna in dhulku ku filan yahay haddii amni jiro, haddii la waayana aanan lagu wada noolaaneyn.

5) Waxaan ummadda Soomaaliyeed ogeysiineynaa in laga gudbay xilligii xumaato ku loollanka, kala irdheysnaanta iyo kala aamin baxsanaanta. Waxaa la gaaray xilligii la sixi lahaa wixii naga khaldamay intii la isku maqnaa, xilligii loo tartami lahaa wanaagga iyo isu samafalka, xilligii aan isaga dayan laheyn dhinacyada wan-wanaagsan ee aynu ku kala horreyno, dalkana la gaarsiin lahaa horumarkii dhaafay muddadii lagu jiray fowdada iyo isfeeryaaca, sidaa darteed qof walba waxaa looga baahan yahay in uu marxaladdan ka qaato kaalinta muhiimka ah ee kaga aaddan sidii uu dalkeennu u tiigsan lahaa horumarkii dhaafay ugana kaban lahaa dib u dhicii ku yimid intii lagu jiray burburka iyo tiiha.

Culimada

6) Waxaan ugu baaqeynaa culimada Soomaaliyeed in ay ku midoobaan kitaabka Alle iyo sunnada nabiga s.c.w. gutaanna xilka Ilaahay ka saaray bayaaninta xaqa iyo ka digista iyo is hortaagidda kooxaha muuqaalka diinta xumeynaya, waxna ku kharriba magaca Islaamka.

Aqoonyahanka

7) Waxaan ugu baaqeynaa aqoonyahanka Soomaaliyeed in ay aqoontooda wax ugu qabtaan dadkooda ee aysan noqonin gudin lagu jaro dadkooda iyo dalkooda, annagoo xasuusineyna in ummad walba ay wax ku tahay inta u kacda iyaguna ay yihiin ubadkii Soomaali u kacay. Waxaan si gaar ah u ogysiineynaa aqoonyahanka ku nool dalka dibaddiisa inay yihiin cuquushii dalka oo maqan sidaa darteed waxaan ugu baaqeynaa in ay aqoontooda, waaya aragnimadooda, muruqooda iyo maskaxdooda uga faa'iideeyaan dalkooda iyo dadkooda oo joogo xilligii ay ugu baahi badnaayeen caqli fiyow iyo cilmi toosan.

Madaxda qabaa'ilka

8) Waxaan madax dhaqameedka qabaa'ilka ugu baaqeynaa Alle ka cabsi, iyo in ay si dhab ah qabaa'ilka ugu maamulaan kitaabka Alle iyo sunnada nabiga s.c.w. kana fogaadaan wax kasta oo keeni kara ka fogaanshaha Alle iyo ehelka ay deriska yihiin, deegaankana wadaagaan.

Beelaha diriraya

9) Waxaan ugu baaqaynaa beelaha walaalaha ah ee is leynaya annagoo Ilaahay ku dhaarineyna in ay si deg deg ah ku joojiyaan dhiigga xurmada leh ee ay sida xaqdarrada ku daadinayaan, gaar ahaan qabaa'ilka ku dagaallamaya gobollada Koofurta Mudug & magaalada Gallinsoor.

Qurbajoogta

10) Waxaan ugu baaqeynaa dadka Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool gaar ahaan waddammada reer galbeedka in ay dalkooda dib ugu soo laabtaan, si ay naftooda iyo ubadkooda uga badbaadiyaan qorshayaasha loo dejiyey ee lagu dhaqan iyo caqiiddo doorinayo, muddada ay ku jiraan u diyaargarowga geeddigana ay ku xirmaan maraakista dacwada ka howlgasha meelaha ay deggan yihiin diintana ku xalliyaan mushkilaadka lasoo dersa ee qof iyo qoys ahaaneed.

Warbaahinta

11) Waxaan ugu baaqaynaa noocyada kala duwan ee saxaafadda soomaaliyeed in ay Alle ka baqaan, ilaaliyaanna diinta iyo akhlaaqda ummadda si ay adduun iyo aakhiroba u liibaanaan, ummaddana usoo gudbiyaan akhbaaro sugan iyagoo kaalin mug leh ka qaadanaya faafinta caqiidada toosa ee ahlussunna waljamaaca iyo is horistaagga caqiidooyinka qaldan iyo dhaqannada silloon ee doolka ah.

Dhallinyarada

12) Dhallinyaradu waa awooddii ummadda, ummad walbana mustaqbalkeedu wuxuu ku xidhan yahay Alle ka sokow kaalinta wanaagsan ee dhallinyaradeedu qaadato, sidaa aawadeed waxaan dhallinyarada ugu baaqeynaa:

b) In ay ku dadaalaan barashada diinta Islaamka iyo ku dhaqankeeda iyagoo diinta ka qaadanaya culimada sida dhabta ah u taqaan, kuna dhaqanta

t) waa inay ka digtoonaadaan in ay qeyb ka noqdaan kooxda Alshabaab ee dalka iyo diintaba rogtay, iyo in ay ka dheeraadaan ka qeybqaadashada dagaallada sokeeye haddey yihiin kuwo leh magac qabiil, magac kooxeed iyo magac diimeed intaba.

j) In ay ka dheeraadaan dhaqannada doolka ah ee duminaya dadnimadooda iyo anshaxa islaamnimo ee bulshadeennu ku dhaadato.

Dumarka

13) Dumarka Soomaaliyeed oo ah madrasada jiilasha oo duullaanno ad-adag oo meelo fog fog laga soo qaaday ay ku wajahan yihiin waxaan ugu baaqeynaa:

b) In ay Ilaahay ka baqaan diintoodana bartaan kuna dhaqmaan si ay u gaaraan raalli ahaanshaha Rabbi ee lagu helo harumar adduun iyo mid aakhiro intaba.

t) In ay ka digtoonaadaan shirqoollada cadowga Islaamku u maleegayaan dumarka ee loogu muuqaal xumeynayo diinteenna islaamka ee uu Alle galiyay sharafteenna adduun iyo badbaadadeenna aakhiro.

j) In ay xil adag iska saaraan barbaarinta iyo tarbiyeynta ubadka si ay berri u noqdaan kuwo qaada xilka diineed iyo ummadeed ee xilligooda.

Maamullada

14)Waxaan ugu baaqaynaa dadka masuuliyadda Ummadda haya in ay Ilaahay uga cabsadaan ummaddooda, danta ummadana ka hormariyaan danahooda gaar ahaaneed, ayna ogaadaan in aakhiro lagala xisaabtami doono xilalka ay hayaan.

15)Maamullada dalka ka dhisan ee talada iyo mas'uuliyadda u haya ummadda, uuna ka dhexeeyo ismaandhaafka siyaasadeed waxaan ugu baaqeynaa annagoo Alle ku dhaarineyna:-

b) In khilaafka ka dhexeeya ay ku dhammeeyaan wadahadal, walaalnimo, is afgarad iyo isu tanaasul.

t) In dalku waa deeqaaye ay dad & deegaanba nabad u ogolaadaan, xil & xulquun wixii ay isku hayaanna ay si cadaalad ah u qeybsadaan, shacabkana xaqooda iska dhowraan.

j) In ay ogaadaan, kana digtoonaadaan in loollanka foosha xun in lagu waayo, masaalixda ay isku hayaan, jiritaanka dalka iyo dadka Soomaaliyeed intaba.

Tahriibta

16)Waxaan ummada Soomaaliyeed ugu baaqaynaa inay ka hortagaan qandaraaska tahriibta ee lagu qixinayo da'yarteenna, annagoo ogeysiineyna in tahriibtu ay tahay mashruuc cusub oo dalka looga saarayo dadkiisa, da'yartana lagu halaajinayo. Hadaba si dhibaatadaas looga baxo waxaan ku baaqeynaa in ummadda Soomaaliyeed ay ka wantoobaan u hayaamidda dalalka shisheeye iyo in ay sameeyaan qorshe heer qaran ah oo lagula dagaallamayo tahriibinta dadka.

17) Waxaan ugu baaqeynaa maamullada dalka ka jira in ay abuuraan mashaariic lagu jiheynayo da'yarta, ayna dhiirri geliyaan waxbarashada, xirfadaha gacanta iyo in ay shaqooyin u abuuraan da'yarta ku dhammaaneysa badaha iyo saxarayaasha iyagoo nolol raadis ah

Fatwo

18)Waxaan dadweynaha Soomaaliyeed u caddeyneynaa xaaraamnimada wax walba oo maanka dooriya, sida qaadka, khamriga, xashiishka iwm, annagoo ugu baaqeyna dadka ku ibtiloobay maandooriyeyaashaas in ay Ilaahay uga towbad keenaan iskana daayaan. Waxaan sidoo kale ugu baaqeynaa maamullada dalka ka dhisan in ay mamnuucaan ka ganacsiga iyo isticmaalka mukhaadaraadkaas ay diintu xarrimtay.

19) Waxaan caddeyneynaa in ummadda Soomaaliyeed shacab, dowlad, qabaa'il, axzaab, ciidan, shibil, carruur, cirroole, rag, haween, culimo iyo caamo ay yihiin dad 100% muslimiin ah, kuna abtirsada manhajka Ahlussunna waljamaaca sidaa darteed ma bannaana in lagu gaalnimo xukmiyo sidaana lagu banneysto dhiiggooda, sharafkooda iyo xoolahooda midna. Dadkeenna tilmaamahoodu sidaa yihiin kooxdii gaalnimo ku xukunta ee dagaal kula soo jeesta waa mufsidiin kharribaya dalka, diinta iyo dadkaba, dadka Soomaaliyeedna waxaa saaran in ay meel uga soo wada jeedsadaan.

20) Waxaan aaminsan nahay caddeyneynaana in dalka Soomaaliyeed uu yahay dal Islaam (Daarul-Islaam) ee uusan aheyn dal lagu jihaado (Daarul-xarbi) iyo dal gaalo midna (Daarul-kufri), kooxaha sidaa si aan aheyn Soomaaliya ku sheegana waa dad heysta caqiidooyin qalloocan, doonayana in ay dhiigga ummadda ku banneystaan shubhooyin aanan diinta boos ku laheyn.

21) Waxaan aaminsan nahay ummadda Soomaaliyeedna u caddeyneynaa in firqada Takfiirka ee uu madaxda u yahay Maxamuud Nuur Cismaan iyo kooxda Alshabaab ee uu madaxda u yahay Axmed Cabdi Muxummad (Godane) in ay yihiin khawaarij ku taagan waddooyinkii qalloocnaa ee diintu inooka digtay, sidaa darteed waxaa waajib ah in laga digtoonaado, lagana fogaado iyo in la is hortaago fitnada gaaleysiinta iyo banneysiga dhiigga xurmada leh ee muslimiinta ee ay xaqdarrada ku daadinayaa. Ma bannaana in cilmi loo doonto in kutubtooda la akhristo iyo la dhageysto inxiraafka diineed ee ay ku dhex faafiyaan dadka aan aqoonta u laheyn diinteenna xaniifka ah.

22) Waxaan aaminsan nahay ummadda Soomaaliyeed u caddeyneynaa weerarkii lagu qaaday suuqa laga dukaameysto ee Westgate ee magaalada Nairobi in uusan aheyn Jihaad Ilaahay diintiisa lagu koryeelayo ee uu yahay ifsaad, takhriib iyo ballanfuryo, aanan Islaamnimada boos

ku laheyn, waana suurad xumeyn lagu sameeyay Islaamnimada iyo sumcad dilid lagula kacay dadka muslimiinta ah eek u nool dalka Kenya iyo dhabarjabin lagu sameeyay dacwadii sida xowliga ah uga socotay Kenya ee ay ay bil walba kusoo islaamayeen boqollaal ruux oo ku qanacday dacwada iyo dhaqan wanaagga dadka muslimiinta ah ee reer Kenya.

23) Waxaan ugu baaqeynaa kooxaha khawaarijta ee Takfiirka iyo Alshabaab in ay Ilaahay uga towbad keenaan xadgudubka iyo muuqaal xumeynta ku sameeyeen diinta Islaamka iyo tacaddiyada kala geddisan ee ay u geysteen dadkooda annagoo xasuusineyna in dulmiga ay ka galayaan diinta iyo dadkeeda ay caaqibadiisu tahay ciqaab Rabbi iyo halaag ku yimaada kooxahaas caadada ka dhigtay dhibaateynta ummadda.

Gabagabo

Waxaan Ilaahay ka tuugeynaa in uu ummadda Soomaaliyeed ka tawbad aqbalo kana dulqaado dhibaatooyinka ragaadiyay ee dad iyo duunyaba halakeeyay, isaga ayaa wax walba awoodee.

Culimada bayaanka saxiixday

1) Dr. Sh. Bashiir Axmed Salaad
2) Sh. Yuusuf Aadam Maxamed
3) Sh. C/Naasir X. Axmed
4) Sh. Maxamed Macallin Axmed
5) Sh. Yuusuf C/Casiis Maxamed
6) Sh. Maxamuud X. Yuusuf Maxamed
7) Sh. C/Qani Qorane Maxamed
8) Sh. Maxamed Godane Xoosh Gaashaan
9) Sh. C/Rashiid Maxamed Ismaaciil
10) Sh. Muxammad Cumar Axmed
11) Sh. C/Risaaq Mire Gaataa
12) Sh. Mukhtaar Axmed Faarax
13) Sh. C/Daahir Xirsi Cali

14) Sh. Maxamed Cali Axmed

15) Sh. C/Raxmaan M’ed Abshir

16) Sh. Jaamac Saciid Ciise

17) Sh. C/Laahi Saciid Axmed (Khayaad)

18) Sh. Xabiib C/Qaadir Axmed

19) Sh. Maxamed Axmed (Dabiix)

20) Sh.C/Razaaq M’ed Muuse

مؤسسة المنهاج للدعوة والتنمية